Haku fadhiisanina qabuuraha, hana u tukanina xageeda

Abii Marsadin Alqanawi Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Haku fadhiisanina qabuuraha, hana u tukanina xageeda".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu reebay in lagu fariisto Qabuurta. Sidaasoo kale wuxuu reebay in xaga Qabuurta loo tukado, oo aysan Qabuurtu noqdan mid ka xigta qofka tukanaya xaga Qiblada, waayo arinkaasi wuxuu keenayaa Shirki.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/10647